IIB MA GALO

# FAAFIN RASMIGA

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad    Muqdisho 1 Feb. 1981    L. 2

*FAAFINTA BIL SOO BAXA*    جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmi-ga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Lacagta.

KOOBNIIN

SHARCI

QAYBTA    KOOWAAD


SHARCI L. 9 ee 4 Jen. 1981, Meel marin Heshiis. Bog. 128

LAW L. 9 on 4th Jen. 1980, Instrument of Ratification. » 129

SHARCI L. 10 ee 17 Dis. 1980, Maamulka Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaa-dir. » 130

SHARCI L. 11 ee 8 Jen. 1981, Ku Biirid Ururka Caalimiga ah ee Dax/ka «Intelst». » 143


Madbacadda Qaranka

SHARCI L. 10 Taariikh 17 Diseembar 1980: Maamulka Dhulka Dhismaha ee G. Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

## QODOBKA 1AAD

(Awoodda Dhul bixinta)

Isagoo Sharciga Lambar 41 ee 13ka Setembar 1973 uu sidiisi u taagnaanayo maamulka iyo gixinta dhulka dhismaha ee Gobolka Banaadir, Qaranka waxaa uga wakiil ah Dawladda Hoose ee Muqdisho.

## QODOBKA 2AAD

(Mabaadi' Guud)

Mabaadi'da iyo tilmaamaha ku cad Qadobbada 2,3,4,5, iyo 6 ee Sharciga lambar 41, soona baxay 13ka Setembar 1973, waa qayb ka mid ah Sharcigan.

## QODOBKA 3AAD

(Jaangooyada Guud ee Dhulka Gobolka Banaadir)

1. Dawladda Hoose ee Muqdisho waxay dhulka Gobolka Banaadir u sameyneysaa jaangooyo guud oo lagu muujinayo dhulka loogu tala galay degsiimada, Warshadaha, Ganacsiga, danaha caamka ah iyo Nabadgelyada.

2. Waxaa kale oo isla jaangooyadaas guud lagu muujinayaa hawlaha adeegga ee laga maarmaanka u ah nolol maalmeedka bulshada, sida koronteynta, biyo gelinta, isgaarsiinta, bulaacadaha iyo wixii la mid ah.

3. Waxay u sameyneysaa meelaha halbowlaha u ah Magaala-madaxda naqshad gaar ah, iyadoo bixinta dhulkaas ku saleyneysa u hoggaansanaanta naqshaddaas.

4. Jaangooyada guud iyo naqshadda gaar ah ee ku xusan qodobkan waa inuu oggolaadaa Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada, kadib marka uu dhageysto talada Guddiga Farsamada.

QODOBKA 4AAD

(Saldhigga dhul-bixinta)

1. Dhul kasta oo la bixinaayo wuxuu noqonayaa mid ku saleysan jaangooyada ku xusan Qodobka 3aad ee Sharcigan.
2. Dhulka leh isticmaal dhismo rasmi ah iyo kuwa leh isticmaal ku meel gaar ah waa in lagu guddoomiyaa go'aan Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbiga Magaalada.
3. Lama bixin karo dhul aan jaangooyada guud ku jirin.
4. Waxaa ka reeban Dawladda Hoose in dhul qof laga wareegay qof kale la siiyo.

QODOBKA 5AAD

(Noocyada loo qeybinayo dhulka)

1. Dhulka ay bixiso Dawladda Hoose ee Muqdisho ee loogu tala galay degaanka wuxuu u kala qeybsamaa laba nooc:

   b) dhul leh isticmaal rasmi ah; iyo

   t ) dhul leh isticmaal ku meel gaar ah.

2. Dhulka leh isticmaalka rasmiga ah wuxuu noqonayaa dhul laga dhisi karo guri ka sameysan daar, laga tixraacayo naqshadda uu soo sameysto qofka dhulka lasiiyo. Naqshaddaas waxaa oggolaanaya Guddiga Farsamada ee Dawladda Hoose ee Muqdisho.

3. Dhulka isticmaalka ku meel gaar ah waxaa laga dhisi karaa oo keliya guri ka sameysan baraako, cariish, mundul, aqal iyo wixii u dhigma.

4. Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah uma baahna in naqshad loo sameeyo, hase yeeshee, dhismuhu waa in uu yahay mid waafaqsan jaangooyada guud iyo maabka Xaafadda.

QODOBKA 6AAD

(U rogid dhul leh isticmaal ku meel gaar ah mid leh isticmaal rasmi ah)

Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah waa loo rogi karaa mid leh isticmaal rasmi ah, kadib:

a) marka qofka leh dhulkaas uu soo weydiisto, isagoo oo finaya shruudaha dhulka leh isticmaalka rasmiga ah.

b) dhulkaasna waa inuu ahaadaa mid jaangooyada waafaqsan.

QODOBKA 7AAD

(Bixinta dhul dhismo)

1. Dawladda Hoose ee Muqdisho, iyadoo dhowreysa sharcigan iyo shuruucda kale ee u yaal dhismaha, waxay awood u leedahay inay siiso dhul dhismo Hay'adaha Dawladda, Iskaashatooyinka, Shirkadaha, Ururrada iyo qof gaar ahaaneed.

2. Siismada ku cad lambarka 1aad ee qodobkan waxay ku xiran tahay in la bixiyo qiime go'an oo lagu jaangooyey mitir laba jibbaaran.

3. Duqa Magaalada Muqdisho wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan sababeysan ku bixiyo, lacag la'aan dhul dhismo, oo leh ku isticmaal ku meel gaar ah.

4. Qiimaha halkii mitir oo laba jibbaaran ee dhulka dhismaha oo leh ku isticmaal rasmi ah waxaa lagu xaddidayaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS, isagoo dhageystay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda. Dhulka kale oo leh ku isticmaal gaar ah waxaa lagu xaddidayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, isagoo dhageystay Duqa Magaalada, kadib markii sidaas ay u guddoonsadaan Guddiga joogtada ee Golaha Shacbiga ee Magaalada. Qiimaha dhulka leh isticmaalka ku meel gaar ah kama badnaan karo 50% midka leh isticmaalka rasmi ah, waxaana loo tixgelinnayaa markii dhulkaas loo rogayo ku isticmaal rasmi ah.

5. Lacagta ka soo gashay dhul bixinta BOQOLKIIBA LABAATAN waxaa lagu wareejinayaa Khasnadda dhexe ee Dawladda.

## QODOBKA 8AAD

### (Habka qaybinta dhulka)

1. Dhulka dhismaha waxaa lagu qeybinayaa hab ku saleysan caddaalad iyo sinnaan iyadoo ujeeddadu tahay in qof waliba uu helo meel uu ku dhisto hoygiisa.

2. Dawladda Hoose ee Muqdisho marka ay qeybineyso dhul degsiimo ah waxay tixgelineysaa arrimaha soo socda:

   b) in da'da qofka dhulka waydiistay ayan ka yareyn 18 sano;

   t ) inuusan ku lahayn Magaalada Muqdisho dhul kaloo degsiimo.

3. Duqa Magaalada Muqdisho, isagoo tixgelinaaya duruufo gaar ah oo la hubiyey, wuxuu dhul siin karaa qof 18 sano ka yar ama dhul kale oo degsiimo ku leh Magaalada Muqdisho.

## QODOBKA 9AAD

(Dhulka dhismo ee Mashaariicda gaar ahaaneed)

1. Ciddii dooneysa dhul dhismo ay ku fuliso mashaariic gaar ahaaneed oo ka mid ah mashaariicda horumarinta dalka, sida Warshadaha iyo wixii la mid ah, wuxuu ka soo qaadanayaa oggolaansho waafaqsan tusmada mashruuceeda hay'adda ku shaqada leh arrinta uu khuseeyo mashruucu.

2. Dhulka lagu bixiyey habka iyo qaabka ku tilmaaman xubinta hore ee qodobkan, looguma isticmaali karo dhismo ama degsiimo hoy ah oo aan mashruuca xiriir la lahayn.

## QODOBKA 10AAD

(Waajibaadka qofka dhulka lasiiyo)

1. Qofka dhulka lasiiyey waxaa laga doonayaa:
   b) in uu u isticmaalo dhulka ujeeddadii loo siiyey oo keliya, haddii uusan ka helin Dawladda Hoose ee Muqdisho fasax ujeeddadii hore ka beddelaya.
   t) in uu bixiyo qiimaha dhulka iyo wixii canshuuro uu sharcigu ku waajibiyey, ha noqdeen canshuuro hadda jira ama kuwa ku soo bixi doona sharciga dambe.
   j) in uu dhismaha ku bilaabo waqtiga loo qabtay oo ku cad warqadda dhul bixinta.
   x) in uu dhismaha waafajiyo jaangooyada guud iyo maabka u degsan Xaafadda wax laga dhisayo.

2. Qofkii u hoggaansami waaya nidaamka ku xusan Lambarka 1aad ee Qodobkan, waxaa lagala noqonayaa dhulkii hore loo siiyey iyadoo aan loo celineyn waxmagdhaw ah, isla mar ahaantaasna waxaa laga duminayaa wixii dhismo ah oo aan loo oggolaan, kharajkana isa gaa la saarayaa.

## QODOBKA 11AAD

(Joojinta Dhismaha)

1. Markay jirto sabab garowsiimo leh, Dawladda Hoose ee Muqdisho waxay amri kartaa joojin dhismo, muddo aan ka badneyn Saddex bilood. Muddada joojinta kuma xisaabsana muddada dhismaha ee qofka loo qabanayo.
2. Waxaa kale oo ay amri kartaa joojin dhismo la bilaabay ama soda, iyadoo sababtu ay tahay dib u habaynta degsiimada.
3. Qafkii dhismaha laga joojiyey ma sheegan karo wax xuquuq ah oo la xiriirta muddada joojinta.

## QODOBKA 12AAD

(Muddada siismada dhulka)

1. Muddada siismada dhulku waxay noqoneysaa sida soo socota:-

   b) siismadu waa u joogto muwaadinka Soomaaliyeed haddii uu fuliyo shuruudaha sharcigu dhigayo.

   t) Dadka ajnabiga ah, muddada siismadu kama yaraan karto 50 Sano, kamana badnaan karto 99 Sano, isla markaasna waa loo cusbooneysiin karaa markay muddadu ka dhammaato.

. Habka siismada dhulka laga baaro ama laga qoto Macdinta, waxaa habeynaya sharciyo gaar ah.

## QODOBKA 13AAD

(Muddada dhismaha)

1. Dhulka leh isticmaal rasmi ah qofkii la siiyaa waa in uu dhismaha ku dhammeeyaa muddo 2 Sano gudaheed, laga bilaabo maalinta uu qofku qaato warqadda dhul siismada.

2. Dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah, qofkii la siiyaa waa inuu dhismaha ku dhammeeyaa muddo ah hal sano gudaheed, laga bilaabo maalinta uu qofku qaato bolleetada dhismaha.

QODOBKA 14AAD

(Kordhinta muddada dhismaha)

1. Qofka dhul la siiyey, haddii ay la soo gudboonaato dhibaato ka hor istaageysa in uu dhismihii ku fuliyo muddadii loo qabtay, Dawladda Hoose waxay u qordhin kartaa muddada dhismaha iyadoo ugu dareysa mar kasta muddo aan ka badnayn tii asalka ahayd.

2. Kordhinta noocaas ahi ma dhaafi karto laba goor, wixii intaas ka badanna waxay noqonaysaa kordhin aan caadi ahayn, waxaana awood u leh Duqa Magaalada Muqdisho.

QODOBKA 15AAD

(Dhismaha sharci darro)

Dhisma kasta oo aan loo soo marin habka bixinta dhulka leh isticmaalka rasmiga ah iyo kan leh isticmaalka ku meel gaaf ah waxaa loo aqoonsanayaa mid sharci darro ah.

QODOBKA 16AAD

(Kicinta ama duminta dhismaha sharci darro)

1) Dawladda Hoose ee Muqdisho, iyadoo fulinaysa jaangooyada guud, waxay amri kartaa kicinta dhismooyinka sharci darrada lagu taagay, ha ahaadeen dhismooyin kooban ama xaafad dhan, kadib markii sidaas uu guddoonsado Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Degaanka.

2) Kicinta dhismaha sharci darro waxay ku imaan kartaa laba sifaale:-

b) Kicin xaafad dhan oo dhismo sharci darro ah, si loo banneeyo dhulka ay ku fadhido, waxayna dhacaysaa marka dhulka ay xaafaddu haysato uu yahay mid soo gelaya ku tala galka jaangooyada, loona qorsheeyey arrimo ka duwan degsiimada caadiga ah.

t) Habeyn xaafad hore u ahayd sharci darro, taasoo la waafajinayo maab loo diyaariyey habeyntaas.

3) Dhismaha sharci darrada ah ma noqon karo sabab lagu helo dhul, kicintiisuna magdhow kama dhalan karo, hase yeeshee Dawladda Hoose waxay qofka laga dumiyey dhismaha sharci darro siin kartaa dhul kale ee uu dego, kaddib marka ay sugnaadaan arrimaha soo socda:-

b) Dhismaha sharci darro uu yahay mid lagu dhaqmay ugu yaraan siddeed sano waqtiga dhaqan galka sharcigan.

t) In ujeeddada loo taagay dhismaha sharci darro ayan ahayn dhul ku helid.

4) Dhul bixinta ka dhalata duminta ama kicinta dhismooyinka kooban ama xaafad dhan waxaa xaq u yeelanaya dadkii markii hore degganaa.

5) Waxaa ka reebban Dawladda Hoose iney dhulkaas siiso dad kale inta ay joogaan dadkii laga dumiyey.

### QODOBKA 17AAD

(La wareegid dhul dan guud darteed)

1) Duqa Magaalada Muqdisho wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro go'aan la wareegid dhul dhisan ama dhul bannaan oo horey qof kale loo siiyey dan guud darteed.

2) Qofka lagu soo saaray go'aanka ku cad lambarka 1aad ee qodobkan wuxuu xaq u yeelanayaa waxyaabaha soo socda:-

b) dhulka dhisan waxaa qofkii lahaa la siinayaa magdhow u dhigma waxa ka dhisan goobta lala wareegay, iyadoo isla mar ahaantaas la siinayo dhulka kale oo u dhigma, cabbir ahaan.

t) Dhulka bannaan waxaa qofkii lagala wareegay loogu beddelayaa dhul kale oo u dhigma cabbir ahaan.

3) Marka la bixinaayo magdhow waxaa la tixgelinayaa in dhismuhu uu yahay mid waafaqsan shuruudaha sharciyeed ee u kala degsan dhulalka leh isticmaalka rasmiga ah ama ku meel gaarka ah.

b) Dhismaha khilaafsan shuruudahaas waxaa loo aqoonsanayaa mid sharci darr oah, qofkiisuna xaq u yeelan maayo wax magdhow ah.

4) Habka iyo qaabka loo marayo la wareegidda hantida gaar ahaaneed dan guud awgeed waa midka ku tilmaaman kuna qotoma Qod. 28 ee Dastuurka J. D. S. iyo Xeerka tirsigiisu yahay 12, soona baxay 28.5.1955.

5) Dhismaha loola wareegay dan guud awgeed, ayadoo la dhowrayo xubinta afaraad ee qodobkan waxaa keliya oo loogu isticmaali karaa dan guud, waxaana reeban in dhismahaas loogu isticmaalo dan gaar ahaaneed.

## QODOBKA 18AAD

### (Ganacsiga Dhulka bannaan)

1) Waxaa mamnuuc ah ganacsiga dhulka bannaan, ha ahaado mid leh isticmaal rasmi ah ama mid leh isticmaal ku meel gaar ah, qofkii dhul la siiyaana ma beecin karo, dhulkana waa inuu u isticmaalo ujeeddadii loo siiyey.

2) Haddii qofka la siiyey dhulka uusan ku dhisi karin muddada ku xaddidan sharcigan wuxuu dhulkii u soo celin karaa Dawladda Hoose ee

Muqdisho, isagoo keenaya warqadihii dhul bixinta, wuxuuna xaq u yeelanayaa in loo celiyo qiimihii dhulka.

QODOBKA 19AAD

(Wareejinta baraatikada dhulka leh isticmaalka rasmiga ah)

Diiwaannada, warqadaha kale iyo maababka la xiriira dhulka leh isticmaalka rasmiga ah ee ku yaal G. Banaadir, horeyna ay u maamuli jirtay Wasaaradda Hawlaha Guud waxaa lagu wareejinayaa Dawladda Hoose ee Muqdisho.

QODOBKA 20AAD

(Dhulkii horey loo bixiyey)

Dhulkii leh isticmaalka rasmiga ah oo ay Wasaaradda Hawlaha Guud horey u bixisay ama baraatikadii siismadu socoto, waxay Dawladda Hoose ee Muqdisho ku wadaysaa habkii maamulka dhulka ee sharciga Lambar 41 oo soo baxay 13kii Setember 1973, iyadoo shuruudda isticmaalka lagu dabbaqayo sharcigan.

QODOBKA 21AAD

(Kadhimid qiimaha dhulka mashaariicda danta guud ku jirta)

Duqa Magaalada Muqdisho, isagoo dhegeystay Guddiga joogtada ah, wuxuu awood u leeyahay in uu qiimaha dhulka ka dhimo ama ka dhaafo qofkii dhisaaya mashruuc ah dhismo gaar ahaaneed oo ay ku jirto dan guud.

QODOBKA 22AAD

(Naadada dhulka leh isticmaalka rasmiga ah)

1) Marka la bixinayo dhul leh isticmaal rasmi ah waxaa la sameynayaa naado oo lagu soo saarayo wargeyska iyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, laguna dhejinayo meelaha caamka ah.

2. Ciddii dood ama hor istaagid ka qabtaa bixinta dhulkaas waxay la soo xiriireysaa qeybta ma-

gaaleynta iyo maamulk adhulka Dawladda Hoose ee Muqdisho, muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.-

QODOBKA 23AAD

(Diiwaaneynta dhulka)

1. Dawladda Hoose ee Muqdisho waxay u sameynaysaa noocyada kala duwan ee dhulka diwaan lagu qorayo dhulalka la bixiyey iyo dhammaan xuquuqda la xiriirta dhismada dhulka.

2. Diiwaangelinta dhulku waa in ay ahaato mid ku saleysan haysasho sharci waafaqsan ee dhulka ama warqado caddeynaya lahaanshaha dhulka ama xukun Maxkamadeed. Tilmaanta warqadaha dhulka waa in lagu xusaa diiwaanka.

QODOBKA 24AAD

(Guddoonka dhul bixinta)

1. Guddoonka dhul bixinta oo leh ku isticmaal rasmi ah waxaa lagu soo saarayaa amarka Duqa Magaalada, kadib marka uu sidaas guddoonsado Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Xamar.

2. Duqa Magaalada Muqdisho wuxuu awoodda dhul bixinta leh ku isticmaal ku meel gaar ah u wakiilan karaa Guddi qaabilsan dhul bixinta oo uu magacaabo.

QODOBKA 25AAD

(Guddiga Farsamada)

1. Dawladda Hoose waxay yeelanaysaa Guddi Farsamo oo joogta ah oo ka talisa jaangooyada guud, midd agaarka ah, Naqshadda dhismaha iyo wixii arrin ah oo la xiriira dhulka degsiimada.

2. Guddiga Farsamada Wuxuu ka koobanyahay Aqoonyahanno, Farsamoyaqaanno sare iyo Sa-

raakiil Caafimaad oo ka kala socda Dawladda Hoose ee Xamar, Wasaaradda Hawlaha Guud iyo hay'addii kale ee la garto.

3. Dhismaha Guddiga iyo habka ay u shaqaynayaan waxaa lagu soo saarayaa Xeer nidaamiye.

QODOBKA 26AAD

(Ciqaabaad)

1. Qof kasta oo ku xadgudba sharcigan waxaa la ganaaxayaa Sh. So. 500. (Shan boqol) ilaa 5.000. (Shan kun), haddii uusan falkiisu keenayn dembi ka weyn.

2. Masuuliinta loo xilsaaray dhul bixinta ee ku xed gudubta qodobbada kala ah: 3,4,5,6,7,8,11, 13,iyo 17 ee Sharcigan waxaa lagu ciqaabayaa xarig, gaaraaya ilaa 5 Sano iyo ganaax gaaraaya ilaa Sh. So. 10.000. (Tuban kun) iyo inay Dawladda Hoose u celinayaan wixii khasaaro ah ama magdhaw ah oo ka dhasha xadgudubkaas.

QODOBKA 27AAD

(Soo saarid Xeer Nidaamiye)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo arkay go'aanka Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Xamar, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer lagu dhaqan gelinayo Sharcigan.

QODOBKA 28AAD

(Awood siin)

1. Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, wuxuu talo ku soo jeedin karaa in lagu wareejiyo maamulka bixinta dhulka dhismaha, labadiisa noocba, degmadii loo arko in ay hanan karto, awood iyo aqoon ahaanba xilkaas.

2. Oggolaanshaha wareejinta maamulka dhul bixinta ee ku cad lambarka 1aad ee qodobkan waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

QODOBKA 29AAD

(Baabi'in)

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

QODOBKA 30AAD

(Dhaqan gelin)

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

Jaalle Maxamed Siyaad Barre